# Miisaaniyadda 2025: Maalgelinta Mustaqbalka Alberta

Miisaaniyadda 2025 waxay la tacaaleysaa caqabadaha hubanti la'aanta ganacsiga iyo amniga iyada oo diiradda saareysa dhaqaalaha.

Maadaama Alberta ay sii waddo dadaallada wax looga qabanayo cadaadiska dhaqaale ee gudaha iyo caalamiga ah, Miisaaniyadda 2025 waxay xoojineysaa dhaqaalaha gobolka. Miisaaniyaddan waxay ka qeyb qaadaneysaa dhismaha bulshooyinka, sugidda xuduudda koonfureed ee Alberta, iyo dhiirrigelinta maalgelinta mustaqbalka dhaqaale ee gobolka.

"Iyada oo aan si dhow ula shaqaynayno la-hawlgalayaashayada si aan u helno xal u ah khilaaf ganacsi oo suurtagal ah, waxaan sii wadaynaa dadaalkeena si aan u xaqiijino in dhaqaalaha Alberta uu xooggan yahay – gudaha iyo dibadda waaxda tamarta – si aan u maareyno caqabad kasta oo naga hor timaada. Miisaniyadda 2025 waxay noo jeexaysaa waddada hore xilli hubanti la'aan ah."
*Nate Horner, Madaxweynaha Guddiga Kaydka iyo Wasiirka Maaliyadda*

## Miisaaniyadda 2025: Taageeridda Shaqaale Xooggan

Shaqaalaha Alberta waa laf-dhabarta dhaqaalaha gobolka. Miisaaniyadda 2025 waxay sii wadaysaa ballanqaadka tababarka iyo horumarinta shaqaale xirfad leh oo adkaysi u leh, si loo kobciyo dhaqaalaha Alberta loogana caawiyo ganacsiyada inay guuleystaan, oo ay ku jiraan:

- $26.1 bilyan oo laga bixiyo Qorshaha Caasimadda saddex sano gudahood, si loo taageero qiyaastii 26,500 shaqo toos ah iyo 12,000 shaqo dadban sannad kasta illaa 2027-28.
- $135 milyan oo loogu talagalay barnaamijyada xirfadaha la bartay, sida tababarka shaqo-barashada iyo barnaamijyada waxbarashada dadka waaweyn, si looga caawiyo reer Alberta inay helaan xirfado iyo tababar ay ugu diyaar garoobaan mustaqbal guuleysta, iyo si loo fududeeyo helitaanka fursadaha shaqo.
- $2 bilyan sanadka 2025-26 si loo taageero loona ballaariyo nidaamka waxbarashada hore iyo daryeelka carruurta, si waalidiinta iyo daryeelayaasha ay uga qayb qaataan tababar, waxbarasho, ama fursado shaqo.

## Miisaaniyadda 2025: Sugidda Xuduudaheenna

- Dowladda Alberta waxay ka go’an tahay inay noqoto deris wanaagsan iyo lammaane ganacsi oo lagu kalsoonaan karo, qayb ka mid ah ballanqaadkanina waa qaadashada tallaabooyin lagu sugo xadka Alberta iyo Mareykanka. Miisaaniyadda 2025 waxay ku daraysaa $29 milyan sanad-maaliyadeedka 2025-26 si loo abuuro Kooxda Kormeerka Kahortagga ee cusub oo ka tirsan Alberta Sheriffs, taasoo la dagaallami doonta tahriibinta sharci-darrada ah ee daroogada iyo hubka, ka hortagga ganacsiga dadka, qabashada dadka isku daya inay xadka sharci darro kaga gudbaan, iyo la tacaalidda falalka kale ee sharci-darrada ah ee ka dhaca xadka dhulka ee Alberta la wadaagto caalamka. Sidoo kale, Miisaaniyadda 2025 waxay ku daraysaa $15 milyan oo lagu maalgelinayo saddex saldhig oo cusub oo loogu talagalay baaritaanka gaadiidka, kuwaas oo laga dhisi doono meelaha u dhow xuduudda Mareykanka, muddada laba sano ah.

## Miisaaniyadda 2025: Maalgelinta Waxbarashada Sare

Miisaaniyadda 2025 waxay maalgelinaysaa wadarta guud ee $7.4 bilyan waxbarashada sare, iyadoo miisaaniyadda hawlgalka ee 2025-26 ay tahay $6.6 bilyan. Tan waxaa ka mid ah:

- $78 milyan sanadkii saddexda sano ee soo socota si loo abuuro fursado waxbarasho oo dheeraad ah oo lagu barto xirfadaha farsamada iyo tababarka shaqo-barashada, si wax looga qabto baahiyaha warshadaha, loo taageero dhaqaalaha, loona xiro reer Alberta fursadaha shaqo.
- $113 milyan si loo daboolo baahida sii kordheysa ee deeqaha waxbarasho iyo Barnaamijka Deeqda Ardayda Alberta, iyadoo $60 milyan laga maalgelinayo Sanduuqa Deeqaha Waxbarasho ee Alberta Heritage.
- $4 milyan oo loogu talagalay Deeqda Jaamacadaha Qabiilooyinka ee First Nations, taas oo si siman loogu qaybiyo shan jaamacadood oo ku yaal bulshooyinka miyiga iyo meelaha fog ee dadka asaliga ah.

“Dowladdeenu waxay xaqiijinaysaa in ardayda Alberta ay helaan xirfado iyo tababar ay uga jawaabi karaan baahiyaha maanta, iyagoo isku diyaarinaya dhaqaalaha mustaqbalka. Miisaaniyadda 2025 waxay sameyneysaa maalgelin aasaasi ah si wax looga qabto caqabadaha ay keentay kororka degdegga ah ee dadweynaha, iyadoo la taageerayo nidaam waxbarasho sare oo waara.”
*Rajan Sawhney, Wasiirka Waxbarashada Sare*

Classification: Public

## Miisaaniyadda 2025: Dhisidda Bulshooyinka

Bulshooyinka firfircoon ee Alberta waxay ka dhigayaan gobolka midka ugu wanaagsan ee Canada lagu noolaado, laga shaqeeyo, laguna koriyo qoys. Miisaaniyadda 2025 waxay maalgelinaysaa bulshooyin xooggan oo dhan Alberta, oo ay ka mid yihiin:

- $17.2 milyan si loo kordhiyo deeqaha la siiyo degmooyinka beddelka canshuuraha hantida dawladeed, iyada oo kor loo qaadayo heerka deeqda laga bilaabo 50 boqolkiiba ilaa 75 boqolkiiba. Sannadka soo socda, gobolka ayaa bixin doona 100 boqolkiiba wixii canshuur ah ee la bixin lahaa haddii dhismaha uu canshuuri lahaa.
- $820 milyan sanadkan iyo $2.5 bilyan saddex sano gudahood oo lagu maalgelinayo nidaamka Maaliyadda Dawladaha Hoose, si loo taageero horumarka kaabayaasha muhiimka ah ee heer degmo.

## Miisaaniyadda 2025: Taageeridda Ganacsiga iyo Kala-duwanaanta Dhaqaalaha

Alberta waxay sii waddaa dadaalka ay ugu jirto kobcinta dhaqaalaha iyo hirgelinta siyaasado taageera wax-soosaarka. Miisaaniyadda 2025 waxay xoojinaysaa guulaha jira iyadoo diiradda la saarayo:

- Soo jiidashada maalgelin dheeraad ah iyada oo loo marayo canshuurta hoose ee dakhliga shirkadaha. Heerka canshuurta shirkadaha ee Alberta oo ah 8% ayaa 30% ka hooseeya gobolka ku xiga ee leh canshuurta ugu yar.
- Bixinta dhiirrigelin dheeraad ah oo loogu talagalay shirkadaha yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah si ay u kordhiyaan maalgelinta cilmi-baarista iyo horumarka, iyada oo loo marayo Barnaamijka Alberta ee Gunooyinka Shaqada Hal-abuurka.
- Horumarinta Alberta sidii lammaane lagu kalsoonaan karo oo taageera ammaanka tamarta ee Waqooyiga Ameerika iyo caalamka, si ay u soo jiidato maalgeliyeyaasha. Gobolka wuxuu horumarin doonaa kaabayaasha jira iyo kuwa cusub si loo ballaariyo suuqyada loo helo kheyraadka tamarta iyo macdanta ee Alberta.
- Taageeridda beeraleyda iyo warshadaha wax-soo-saarka ee Alberta, iyada oo la xallinayo caqabadaha ganacsiga, la kobcinayo suuqyada dhoofinta, lana ballaarinayo helitaanka suuqyada cusub ee badeecadaha Alberta.
- Xoojinta Alberta sidii saameyn weyn ku leh ammaanka tamarta Waqooyiga Ameerika, iyadoo sii wadaysa dadaallada lagu xayeysiinayo waaxda tamarta ee Alberta gudaha Canada, Mareykanka, Jarmalka, Japan, iyo guud ahaan adduunka.

## Miisaaniyadda 2025: Maalgelinta Ganacsiga iyo Warshadaha

Miisaaniyadda 2025 waxay sii wadaysaa raadinta fursado lagu kobcinayo dhaqaalaha Alberta iyada oo maalgelinaysa ganacsiga iyo warshadaha, taasoo gacan ka geysaneysa horumarka dhaqaale, oo ay ka mid yihiin:

- Taageero lagu soo jiidanayo maalgelinta waaxda tamarta iyo kheyraadka macdanta ee Alberta, si loo dedejiyo fursadaha kheyraadka cusub ee soo baxaya.
- $45 milyan oo loo qoondeeyay saddex sano gudahood Barnaamijka Maalgelinta iyo Kobaca (Investment and Growth Fund), si loo soo jiito maalgelinta gudaha dhaqaalaha Alberta.
- $1.8 milyan oo lagu maalgelinayo Western Crop Innovations si loo hormariyo cilmi-baarista horumarsan ee dalagyada.
- $780,000 oo lagu taageerayo farsamaynta hilibka ee ganacsiyada yar yar iyo kuwa dhexdhexaadka ah.
  • $3.1 milyan oo loo qoondeeyay Jaamacadda Calgary, Kulliyadda Daawada Xoolaha, si loo ballaariyo xarun baadhista cudurrada xoolaha oo si buuxda u shaqayn doonta. Tani waxay beeraleyda xoolaha iyo dhakhaatiirta xoolaha siin doontaa adeegyo baaris oo degdeg ah, oo qiimo jaban, laguna helo meel u dhow.

“Miisaaniyadda 2025 waxay dhisaysaa Alberta xooggan iyadoo kor u qaadeysa warshadaha, abuuraysa shaqooyin tayo sare leh, oo ballaarineysa fursadaha shaqaalaha iyo qoysaska. Iyada oo la adeegsanayo maalgelin istiraatiiji ah oo lagu horumarinayo hal-abuurka, kaabayaasha, iyo kobcinta shaqaalaha, Alberta waxay u diyaargarowday caqabadaha, iyadoo xoojinaysa mustaqbalka gobolka sanadaha soo socda.”*Matt Jones, Wasiirka Shaqooyinka, Dhaqaalaha, iyo Ganacsiga*

“Waxaan horumarinaynaa cilmi-baaris casri ah oo ku saabsan dhinaca beeraha, anagoo taageerayna ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah. Sidoo kale, waxaan xoojinaynaa kaabayaasha beeraha si loo hubiyo adeegyo degdeg ah oo la awoodi karo oo loo fidiyo beeraleyda xoolaha iyo dhakhaatiirta xoolaha. Waxaan dhiirrigelinaynaa hal-abuurka, soo jiidanaynaa maalgelin, oo dhisaynaa dhaqaale adkaysi u leh mustaqbalka.”
*RJ Sigurdson, Wasiirka Beeraha iyo Waraabka*

*Miisaaniyadda 2025 waxay wax ka qabanaysaa caqabadaha horyaalla Alberta iyadoo sii waddo maalgelinta waxbarashada iyo caafimaadka, hoos u dhigaysa canshuuraha qoysaska, iyo diiradda saareysa kobcinta dhaqaalaha.*

## Xogta la xariirta

- Miisaaniyada 2025 (Budget 2025)

## Related news

- Miisaaniyadda 2025: La tacaalidda Caqabadaha (Budget 2025: Meeting the challenge (Feb 27, 2025)
- Miisaaniyadda 2025: La tacaalidda Caqabadaha Caafimaadka iyo Waxbarashada (Budget 2025: Meeting the challenge in health and education (Feb 27, 2025)

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo Khudbadda Miisaaniyadda (Watch the Budget address)
- Daawo Shir Jaraa'idka (Watch the news conference)
- Dhageyso Shir Jaraa'idka (Listen to the news conference)